**WARJECEL.COM**

Wakaaladda Mareegaha Wararka Soomaaliyeed

## SAAMEEYNTA UU BULSHADDA KU YEESHAY BUUGGII MIYIGA ILAA MADAXTOOYADDA



# WARBIXIN BUUGGA MIYIGA ILAA MADAXTOOYADDA

INTEE IN LEEG AYAA KASOO HORJEEDSATAY INTEE SE TAAGEERTAY

madaxtooyada

Xasan miyi

hore Kala

miyiga Xirsi ilaa

buuga

wasiirkii

xaaji Cali madaxweyne

buug qoray

# Tusmo


| | | |
|---|---|---|
| 1 | Hordhac | 1 |
| 1.1 | Ujeedada Warbixinta | |
| 1.2 | Buugga "Miyiga ilaa Madaxtooyadda" | |
| 1.3 | Warbixinta iyo hufnaanta xogta ay ku salaysantahay | |
| 2 | Buugga Iyo Hadal-Hayntiisa | 1-5 |
| 2.1 | Buugga iyo bahda qoraalka | |
| 2.2 | Buugga iyo garyaqaanada | |
| 2.3 | Buugga iyo waxay ka yidhaahdeen siyaasiyiinta ku xusani | |
| 2.4 | Buugga iyo waxay ka yidhaahdeen siyaasiyiinta Somaliland | |
| 2.5 | Buugga iyo waxay ka yidhaahdeen bahda waxbarashadu | |
| 3 | Buugga iyo Baraha Bulshada | 5-7 |
| 3.1 | Buugga iyo Baraha Bulshadda | |
| 4 | Falanqaynta warjecel | 7-9 |
| 4.1 | Buugu faa'iido ma u leeyahay bulshadda? | |
| 4.2 | Buugu sumcadii qoraa ma korbuu u qaaday mise hoos buu u dhigay? | |
| 4.3 | Saadaasha mustaqbalka iyo qoraanimada Xirsi | |
| 5 | Gunaanad | 10 |
| 6 | Tixraac | 10 |

# 1. Hordhac

## 1.1 Ujeedada Warbixinta

Warbixintani waa warbxin ku saabsan Buugii uu qoray qoraa Xirsi Cali X. Xassan oo ahaa Wasiirkii Madaxtooyadda ee dowladdii Madaxweyne Axmed Maxamed Maxamuud (Siilaanyo), hadana ah Hogaamiyaha Xisbiga mucaaradka ah ee Waddani. Warbixintu waxay xoogga saaraysaa sidey bulshadda Somaliland u aragtay buugga, xogta uu siddo iyo qoraagaba. Waxa ay warbixintu sidoo kale diiradda saaraysaa qoraalka ku jira buugga ee sheegaya in muddo yar kadib markii Madaxwayne Siilaanyo xilka la wareegayba xasuustiisii hoos u dhacday.

Warbixintu waxay ku salaysantay wixii ay buugga ka yidhaahdeen siyaasiyiinta, qoraayada, garyaqaanada, barayaasha tacaliinta sare, wararka mareegaha soomalida iyo faalooyinka taban iyo kuwa togan ee baraha bulshadda la isku waydaarsaday. Qaybta ugu danbeeysa ee warbixintu waa faallo ku salaysan arimahaas aynu soo sheegnay ee buugga laga yidhi oo ay diyaarisay bahda Warjecel.com oo ah wakaalad madaxbanaan oo uruurisa wararka mareegaha (websites) soomalida lagu baahiyo.

Xog uruurinta warbixintani waxay bilaabantay laga soo bilaabo habeenkii buugga la soo bandhigay ilaa iyo hadda oo ay warbixintu soo baxday. Warjecel.com waxay warbixinta mudadaas intaas leeg u siisay, si ay ula eegto wakhtiga iyo bal in ay rumoobeen faalooyinkii saadaasha ahaa ee laga sheegay buugga.

## 1.2 Buuga ”Miyiga ilaa Madaxtooyadda”

Buugan waxa qoray siyaasi Xirsi Cali X. Xasan oo hadda ah hogaamiyaha xisbiga mucaaradka ah ee Waddani. Bugga Xirsi wuxuu u bixiyey ”Miyiga ilaa Madaxtooyadda”, kaas oo markiiba akhristaha tusaya in buugu ku saabsanyey noloshii Xirsi laga soo bilaabo markuu miyiga ku noolaa ilaa laga soo gaadhayo shaqadiisii madaxtooyadda. Buugu sidoo kale wuxuu cutubka u danbeeya ka sheekeeynayaa ka bixistii Kulmiye iyo ku biiristii Waddani ee Xirsi iyo siyaasiyiintii kale ee markaas wehelinayay. Sida buugga akhristuhu ka dhadhansan karo Xirsi iyo noloshiisa Xisbigga Waddani wey danbeeysaa oo kuma xusna buugga, waayo wuxuu qoraalka ku joojinayaa doorashadii 2017 ee Madaxtooyadda.

## 1.3 Warbixinta iyo hufnaanta xogta ay ku salaysantahay

Warbixintani waxay ku salaysantahay xoggo rasmi ah oo ay bud-dhig u tahay hufnaan iyo daah-furnaan. Xogta warbixintu ugu horeeyn waxay ka koobantahay laba qaybood oo waaweeyn kuwaas oo kala ah:

I. Xogta ku salaysan qoraalka iyo hadalka (Qualitative).

II. Xogta ku salaysan tirrada ama xisaabta (Quantitative).

Qaybta koowaad ee xogta ku salaysan qoraalka iyo hadalka ayaa ka kooban qoraalo ama maqaalo laga qoray buugga iyo hadalo maqal iyo muuqaal ah oo ku saabsan buugga kuwaas oo lagu baahiyey Internet-ka. Qaybta labaad ee ah xogta ku salaysan tirrada ama nambaradda ayaa ah mid ku salaysan xog-ururin ay warjecel.com ka dhex sameeysay baraha bulshadda. Qaybta baraha bulshada ayaa ku qotonta xogta ah faalooyinka ay bulshadda rayidka ahi ka bixisay qoraalada lagu baahiyey baraha bulshada ee Facebook iyo Twitter. Mudadda ururinta xogtu waa intii u dhaxays 20/11/2018 ilaa 15/01/2019.

# 2. Buugga Iyo Hadal-Hayntiisa

## 2.1 Buugga iyo bahda qoraalka

Bahda qoraalku ama qalinleeydu waa dadka u saaxiibka ah wax qorista, akhriska iyo falanqayntoodaba. Maadaama oo ay warbixintani la xidhiidho qorista isla mar ahaantaasna uu qoraaga buugu dhowr waraysi oo laga qaaday uu ku celceliyey in hadii bahda qoraalku ku aragto wax qaldan buugiisa uu dib u eegi doono, aynu soo qaadano waxay ka yidhihaadeen buugga qalinleeydu.



Guuleed Axmed Xaashi waa qoraa qoray maqaal uu ku falanqaynayo buugga, isagoo tilmaamaya tabnaanta (dhaliisha) iyo tognaanta (wanaaga) buugga. Qoraagu horaanta maqaalka wuxuu kaga afeef dhiganayaa inaanu isagu soo cadeeyn karin taariikhaha iyo dhacdooyinka uu Xirsi buuggiisa ku xusay saxnaantooda, balse ay u taalo dadkii isaga la shaqeeynayay ee wakhtigaas gobjooga ahaa.

Qoraagu marka uu si guud uga hadlayo tognaanta ama fiicnaanta buugga waxa uu odhanaya sidan, *"Buuggani waxa uu u badan yahay dhiirrigalin iyo in akhristaha da'da yar uu dareemayo in inta meel aan waxba oollin laga dhaqaaqo meel fog la gaadhi karo"* (Xaashi, 2018, para.7).

Imikana bal aynu eegno tabnaanta ama dhaliisha uu maqaalka qoraa Guuleed Axmed ku sheegay buugga Xirsi. Dhaliilahaas waxa ka mida in qoraa Xirsi dhacdooyinkii isaga noloshiisa ka horeeyey aanu wax tixraac ah raacin, sida dhacdooyinka dhacay intii u dhaxaysa 1839 ilaa 1900, waayo waxkasta oo la soo xigtaa kama maarmo in la xuso meesha, goorta iyo cida laga soo qaatay. (Xaashi, 2018, para.17).

Qoraa Xaashi waxa kale oo uu falanqayntiisa kusoo qaadanayaa qodobkii ugu ugu hadal-haynta badnaa xagga bulshada ee ku saabsanaa xasuusta hoos u dhacday ee Madaxwayne Siilaanyo, waxaanu is waydiinayaa su'aalahan:

Ma inta aayar uun lala soo hadlay Xirsi iyo Maxamuud Xaashi oo ku wehelinayay ayaan waxba iyaga la weydiin?, qoyska aan marwada ahayn ee markii la joogay madaxweynaha yay ahaayeen? inkasta oo aanu macluumaadkani u muuqan wax sir ah qoraaguna (Xirsi) xusay uun in xasuusta madaxweynuhu hoos u yara dhacday haddana fikir ahaan markaad eegto dhaqankeena qoraaga buuggu may ahayn in uu dhacdadaas ku daro, waayo wakhtigii ku haboonaa may ahayn, sababtuna waa qoraalka iyo hufnaanta oo aynaan baran, sidoo kale waxay saameeyn taban ku yeelan kartaa mustaqbalka qoraaga ee dhinaca siyaasadda. (Xaashi, 2018, para. 23).

Qoraa Faarax Maxamuud oo isna ah qoraa la yaqaan ayaa waxa uu qoray maqaal uu ugu magac daray *"Gorfayn"* oo uu kaga faaloonayo buugga Xirsi iyo siduu u arko. Maxamed (2018), waxa uu marka hore ku hambalyaynayaa Xirsi inuu baneeyey waddo siyaasiyiinta kalena ku dhiirigalin karta inay wax qoraan oo taariikh reebaan, isaga oo u cuskanaya in ay yartahay siyaasi soomaali ah oo xusuus qor ka reeba noloshiisa ama hawlihii uu soo qabtay. Bal aynu dhowrkan qodob kasoo qaadano dhaliilaha Maxamuud (2018).

1. Cutubyada buugga ee 3aad iyo 4aad waa qaar aad u qurxoon si fiicana uu qoraagu (Xirsi) ugaga hadlayo noloshiisii caruurnimo iyo waalidkii, sidaa darteed waxa fiicnayd inuu qoraagu buugga halkan ka bilaabo;

2. Cutubyada 14aad iyo 15aad oo ah kuwa uu Xirsi kaga hadlayo mudadii uu wasiirka ka ahaa madaxtooyadda, waxa kuusoo baxaysa siduu Xirsi awooda badan u uruursaday una ahaa kaligii muuqdaha wadanka;

3. Xirsi waxa uu sheegay in uu yeeshay cadow badan oo xataa ay gaadhay in kuwa shaqadooda ka saaqidaa yidhaahdaan Xirsi baa na eryay, laakiin Xirsi waxaanu fahansanayn in awood urusigiisu u sabab ahaa waxaas oo dhan;

4. Walow dad badani aad uga qayliyeen arinta ku saabsan in xasuustii madaxwaynuhu hoos u dhacday, rabeyna inuu is casilo, hadana cay iyo ceebtoona maleh in qofka xasuustiisu hoos u dhacdo weliba marka laga hadlayo madaxwayne aan hadda xilka hayn, laakiin qoraalkan waxa ka soo baxaya laba arimood oo qoraalka Xirsi wax u dhimaya kuwaas oo kala ah:

a. Xirsi wuxuu odhanayaa "ugu danbeeyn se madaxwaynihii waa ka noqday go'aankii markii ay qoys ahaan gaar u wada hadleen." halkaas waxa kasoo baxaysa in talo qaran jirin balse ay jirtay qoysnimo qaranka lagu maamulaa;

b. Hadii talo qaran wax lagu maamuli jiray miyaanay ahayn in arinta la ogeysiiyo Madaxwayne ku-xigeenka, Guurtida iyo Barlamaanka. Haddaba, hadii aanay sidaas sameeyn Xirsi iyo Wasiir Maxamuud Xashi, halkaas waxa ka muuqata khiyaano qaran.

## 2.2 Buugga iyo Garyaqaanada



Garyaqaan Guuleed Dafac waa garyaqaan da' yar ahna qof wada akhriyey Buugga aynu ka hadlayno. Mar uu u waramayay Saab Tv wuxuu sheegay ugu horeeyn in qof madaxi buug qoraa inay faa'iidooyin badan u leedahay bulshada aduunka oo wixii uu usoo joogay qofku markuu qoro waxay anfacaysaa dadka danbe boqolaal sano kadib, sidaas ayeyna diiwaanka ku gashaa. Wuxu intaas ku daray in qoraalku fa'iido u yahay dadka xilka hadda fadhiya oo waxay iska ilaalin karaan qaladaadkii kuwii ka horeeyey ay sameeyeen. (SAAB TV, 2018, 1:10).

Dafac mar la weydiiyey sababta buugu murankа iyo buuqa bulshada reer Somaliland uga dhex dhaliyay wuxuu ku sababeeyey sidan, *"waa qofkii u horeeyey ee awoodaa badan leh ee buug ka qora taariikh iyo dhacdooyin badan oo uu usoo taagnaa, markaa dad badan ayaa laga yaabaa inay la yaab ku noqotay"* (SAAB TV, 2018, 2:14).

Garyaqaan Dafac arimaha kale ee uu wareysiga SAAB TV (2018), ku xusay hadaynu qodobeeyno wuxuu xusay ilaa lix qodob oo kala ah:

- Inaanu buugga ku arag wax u eeg qalad ama sharci darro, marka loo eego qaanuunka dalka u yaala;
- In aanay dhacdooyinka shaqada dowladdu sir ahayn iyo in buugga aanay ku qornayn wax la odhan waa sir;
- In fakarka guud ee odhanaya xasuusta madaxwaynaha waxbaa ka si ahaa waa waxyaalaha dadku isla wada ogaayeen ee mucaaradku ku hadli jireen ee aanu ahayn wax cusub oo Xirsi hindisay;
- In hadii ashkato timaado aanay jirin sabab ay Maxkamadu u aqbashaa, balse haday aqbashana taasi wuxuunbey dhib ku tahay madaxwaynihii hore oo loo baahdo in Maxkamadda lasoo hortaago lana weydiiyo su'aalo;
- In buugu siduu u qoranyahay quruxdiisa iyo qurux la'aantiisu tahay waxyaalaha ay dadku faaleeyn karaan, odhana karaan Xirsi wuu ku qaldanaa ama wuu ku saxsanaa;
- In hadii ay jirto inaan madaxwaynaha caafimaadkiisu sax ahayn aanu Xirsina danbigaa ka fara madhnayn;
- In casharka halkan laga baran karaa yahay in murashaxiintu markay tartamayaan tahay in caafimaadkooda la baadho.

## 2.3 Buugga iyo waxay ka yidhaahdeen siyaasiyiinta ku xusani



Wasiir Maxamuud Xashi wuxuu ka mid ahaa wasiiradii ka soo qaybgalay xafladii soo bandhigista buugga ee 26kii Juun 2018. Wasiirka inaynu soo qaadano waxa keentay in qoraagu (Xirsi), buugiisa ku qoray sidan *"30 Aug 2010 subaxnimadii hore ayay ila soo hadashay marwada madaxweynuhu iyadoo naxdini ka muuqato hadalkeeda, waxaanay ii sheegtay in arrini soo korodhay oo aan u imaaddo. Aniga oo naxsan ayaan soo baxay. Waxaan gaadhay gurigii madaxweynaha anigoo aad u naxsan.*

*Marwadii ayaa ii soo baxday, waxaanay iiga warrantay in xalay madaxweynaha xaaladi kusoo korodhay, oo uu yidhi waan is casilayaa! Intii aanu hadalkii hayno, ayaa wasiir Maxamuud Xaashi, oo isagana ay marwadu wargelisay, noo yimi. Markii aannu is waraysannay waxaa sababtii nooqotay in madaxweynuhu ka werweray xusuustiisa oo hoos u dhacday, ugu danbayn se uu madaxweynihii ka noqday go'aankii, markii ay qoys ahaan gaar u wada hadleen"* (Xasan, 2018, 145-146).

Wasiirka Maxamuud Xaashi isaga oo ka jawaabayaa arintaas ku xusan Buugga ee xasuusta Madaxweynaha wuxuu waraysiga ERYAL TV (2018), odhanayaa *"Arintaa Xirsi uu buugiisa ku qoray anigu Maxamuud ahaan goobjoog kamaan ahayn kulan naloogu yeedhay madaxwaynuhu xiligaa uu talada dalkaba ku cusbaa ee uu buulcawska ahaa, kulan naloogu yeedhay oo micnihiisu daaranaa in madaxweynihii xusuustiisu luntay ama xumaatay, uu is casilay, la ladqabeeyey, welwel ka muuqdo, arintaa anigu goobjoog kamaan ahayn sidaa darteed dhacdadaa markhaati kama ahi waana mid aan sugneyn"* (ERYAL TV, 2018, 2:11).

Arinta labaad ee qoraagu buugiisa ku xusay ayaa ahayd in Marwada Madaxweyne Siilaanyo ay labadii sano ee muddo xileedkiisa u danbeysay ay talada dalka kusoo dhawaatay oo noqonaysa wakhtigii uu Maxamuud xaashi wasiirka ka ahaa Madaxtooyada. Wasiir Maxamuud Xaashi wuxuu kaga jawaabay taas in aanu Xirsi ka warami karin mudadii aanu joogin balse tiisii uun uu ka sheekeyn karo. (ERYAL TV, 2018, 2:27) Wasiirku intaas wuxuu ku daray in Xirsi marwada amaanay isna amaantaas uu kusii darayo inay ahayd marwo ilaalisa sharafta ninkeeda iskana ilaalisay inay farofarayso maamulka dowladda. (ERYAL TV, 2018, 3:39).

Wasiir Maxamed Xaashi Cilmi waa wasiirkii Maaliyadda ee dowladdii Madaxweyne Siilaanyo. Xirsi Markale buugiisa wuxuu ku xusayaa inay dowladdii Siilaanyo markii ay xilka la wareegtayba ay la kowsatay lacag la'aan taasooy sabab u ahayd wasaaradii maaliyadda oo akoonkeeda lagu lahaa dayn dhan 120 Bilyan oo SL shilin ah, taasoo keentay in Madaxweynuhu talo waydiiyo Xirsi iyo Maxamed Xaashi Cilmiba talodooda iyo bal sidey ay la tahay halka wax laga bilaabayo. Xirsi wuxuu xusayaa in taladiisii la qaatay oo markaas ahayd in ganacsatada lacag laga amaahdo kadibna Madaxweynuhu u diray inay labadoodu arintan sida ugu fiican usoo eegaan, taasoo keentay inay hawshii labadoodu wada qabtaan kuna dhameeyeen in lacagtii laga soo amaahday ganacsatada badankeedii la iskaga bixiyo mushaharkii shaqaalaha ee taagnaa markaas. (Xasan, 2018, p. 136-137).

Xirsi gunaanadka sheekada ayuu ku xusayaa sidan, *"in kasta oo wasiirku u dhashay nin madax-adag, hadana wuxuu garwaaqsaday talooyinkaygii dhinaca maaliyadda waxaanu madaxweynaha waydiistay in aan maalin kasta galinka hore la shaqeeyo. Waxa aanu isu iman jirnay subax kasta intii aannu ka soo kabanaynay duruuftii dhaqaale ee qallafsanayd. Markii aannu ka soo kabannay culayskii na haystay ee maaliyadeed, waxaan ku mashquulay hawlihii madaxtooyada iyo shaqadii xafiiskayga"* (Xasan, 2018, p. 138).

Hadaba waxa isna su'aal la xidhiidha arintaas Xirsi buugiisa ku xusay ka jawaabay Wasiir Maxamed Xaashi Cilmi oo Eryal Somali Tv waraysi siiyey isagoo sheegay inaanu isagu Xirsi waxba uga baahan marnaba.

## 2.4 Buugga iyo waxay ka yidhaahdeen siyaasiyiinta Somaliland

Xafladii soo bandhigista buuggu waxay ahayd mid dad aad u badani kasoo qaybgaleen markaad u eegto xafladihii hore ee la midka ahaa. Waxa ka soo qaybgalay siyaasiyiin caan ah oo ay qaarkood buugga ku xusnaayeen. Aynu ku horeeyno Jamaal Cali Xuseen oo ah siyaasiyiinta lodka Xirsi ah, haatana ka tirsan xisbiga talada haya ee Kulmiye. Walow Jamaal uu sheegay inaanu buugga weli akhrin, hadana wuxuu sheegay inuu Xirsi taageersanyey waxaanu yidhi sidan:

*Xirsi waxaan ugu bushaareeynayaa oo aan leeyahay, kol hadii buugii oo aan la soo bandhigin ay qayladiisii aad u badatay, guulbay kuu tahay baan u malaynayaa horta adiga, sababtoo ah waxay dadku hadal hayaan uun waxa ay xiiseynayaan, waana publicity oo haday xumaato iyo haday wanaagsanaatahay labadaba waa positive oo aad bay u wanaagsantahay* (Juba Tv, 2018, 0:34).

Siyaasi Jamaal Cali Xuseen sidoo kale wuxuu sheegay in siyaasiyiintii hore ee reer Somaliland ay aad u tiro yaryihiin inta buug qortay. Labada arimood ee uu Jamaal Xirsi ku taageeray ayaa ah inuu Xirsi yahay, siyaasi dhaliinyaro ah oo dhaliinyaradiina ay siyaasadii ka riixanayaan odeyaashu iyo in maadaama isaguba (Jamaal) uu qoraa yahay ay waajib tahay inuu taageero. (Juba Tv, 2018, 2:35).

Wasiir Maxamuud Xaashi oo aynu hore u usoo xusnay inuu ahaa ragii uu Xirsi buugiisa ku soo qaatay kana qaybgalay xafladii soo bandhigista buugga, ayaa hadal uu ka jeediyey xafladaas ka sheegay, in aanay wax fudud ahayn in la qoro buug baaxadaas leh. Wasiirku sidoo kale wuxuu habeenkaas amaanay Xirsi, waxaanu yidhi.

*"Xirsi waxaan ku aqaanaa nin fahmo badan oo waxaanu hore u arag marka uu arko hadana si degdega u fahma oo dadka hibada leh ayaan ku aqaanaa, waxaan ku aqaanaa hawl-karnimo, waxaan ku aqaanaa hal-abuur, waxaan ku aqaanaa nin damac badan oo labada positive iyo negative-ba wey yeelataa…, waxaan ku aqaanaa Xirsi nin mabda'iisa ku adag oo u go'a oo waxaan ku taageerayaa Mukhtaar arinkii ahaa Xirsi meelbuu maraa oo iyaduna waa raganimo oo qiimaha siyaasadeey ka mid tahay inaanad labacleeyn ee aad hal meel marto oo siyaasada waa ku amaane ceeb kuma aha oo taana waan ku taageerayaa, qudhayduna la mid baan ahoo dhinac uunbaan maraa" (Farhan Media Pro, 2018, 4:25).*

Intaa wuxuu ku sii daray Wasiirku in Xirsi horena saaxiib u ahaayeen imikana saaxiib yihiin balse ay ku kala irdhoobeen Axmed Siilaanyo dabadii xagee reerka iyo qaranka loo jiheeynayaa. Farhan Media Pro, 2018, 6:22).

### 2.5 Buugga iyo waxay ka yidhaahdeen bahda waxbarashadu

Dhanka bahda waxbarashada waxa arintan buugga ka hadlay Bare sare Cabdi Cali oo ka mid ah barayaasha Jaamacadda Hargeysa isla markaana ah dadka magaca ku dhex leh bulshadda Somaliland khaasatan ardayda, ahna xubin Xisbiga Kulmiye ah. Barre sare Cabdi Cali mar uu la hadlayay Saab Tv, wuxuu dhaliilay sidii uu wasiir Maxamuud Xaashi uga fal celiyey arinta xusuusta Madaxwayne Siilaanyo ee ku xusan buugga, waxaanu yidhi sidan.

*"Waxa weeyaan Maxamuud Xaashi dee waa saaxiibkeey, laakiin saaxiibkeey wuxuu ka jawaabay su'aal aan meesha oolin, wuxuu ka jawaabay su'aal odhanaysa xiska Madaxwayne Siilaanyo ma caadibuu ahaa, laakiin taa may ahayn su'aashu. Su'aashu waxay ahayd intii Xirsi yidhi ee ahayd xasuusta Madaxwayne Siilaanyo hoos bay u dhacday, weliba gaar ahaan waxay hoos u dhici jirtay marka hawluhu ku bataan ee stress-ku ku bato, markaa waxa weeyaan isaguba wuu inoo sheegay dee Xirsiba inuu Madaxwayne Siilaanyo go'aanada qaadan jiroo ay ka mid ahayd go'aanadii qadhaadhaaye dee Maxamuudna sheegay, dee Xirsiba wuu sheegay in go'aankii qadhaadhaaye dee Muuse lagu sharaxayay ee musharaxiinta kale lagu reebaayey ee dabadeed Xirsi iyo wasiiradiisu isku casili jireen… waa kii Xirsi ina lahaa hadaan Madaxwaynuhu talinayn maxaan isu casilayaa anigu, markaa inta Maxamuud sheegay wuu la ogolyey Xirsina, markaa dee waxay ahayd in Maxamuud war cusub inagu soo kordhiyo dee ama wax inaga badalo… taa Xirsi waxbuu inooga sheegay, laakiin Maxamuud waxba inagumuu kordhin baan odhan karaa"* (SAAB TV 2018, 0:16).

Cabdi Cali wuxuu intaas kusii daray in qofka beenaalaha ahi waxba qori karin, markay qoraalkan noqotana runtuuni soconayso, isagoo ula jeedaa in Xirsi wax run ah oo jiray uu ku xusay buugiisa. (SAAB TV 2018, 2:38).

## 3 Buugga iyo Baraha Bulshada

### 3.1 Buugga iyo Baraha Bulshadda

Baraha bulshaddu imika waxay noqdeen meelo lagu faaqiddo waxkasta oo hadda ka dhacaaya aduunka, taas oo keentay in ay noqdaan meelo ay siyaasiyiinta laftoodu ku gudbiyaan fikradahooda iyo siyaasadooda. Hadal-haynta siyaasadda soomaalida ee baraha bulshaddu waxay maanta gaadhay heer aanay dadku isku hawlin inay warakasta gaar ula socdaan, waayo asxaabtooda ayaa la wadaagaysa link-ga warka, taas oo u saamaxaysa inay sidoo kale la socdaan faalooyinka (comments) ay bulshaddu ka bixinayso warkaas.

Bal aynu laba dhacddo tusaale usoo qaadano, si aynu u ogaano saameeynta weyn ee ay baraha bulshadu ku yeesheen guud ahaan soomaalida, gaar ahaan arimaha siyaasadda.

Tusaale 1.

Allah ha u naxariistee Khaalid Yare oo ahaa 14 jir, waxa liqay Baligga xaafadda Daami ee magaladda Hargeysa bishii hore ee November. Hooyadii Khadra oo la ka hadlaysay HCTV oo aad u murugaysani waxay tidhi sidan, *"habeen inankayga daasad caano ah uma dhigin, quruxdiisana Facebook-ga daawo"* (Horn Cable Tv, 2018, 0:45).

Hooyadaas ilmaheeda Alle haka cawilo, balse tani waxay ina tusaysaa in maanta xataa waalidiintu ka war hayaan saameynta balaadhan ee ay yeesheen baraha bulshaddu, weliba Facebook.

Tusaale 2.

Dhamaadkii Bishii hore ee November 2018, waxa baraha bulshadda wareegayay video uu Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Somaliland mudane Muuse Biixi Cabdi joogo Burco kana hadlayo Facebook-ga iyo inuu ka war qabo in dhaliinyartu isaga halkaas kala soo kaftamaan, waxaanu yidhi sidan "*... soomaalidu berigii hore ardaagay ku kaftami jirtee, qolo dhaliinyaro ahoo aanan is waji aqoon, laakiin aan kaftanoo ka hadashay meeshan la yidhaa Facebook-ga ayaa wiiganba ila soo kaftamaysay, markaa waxay yidhaahdeen madaxweynuhu Burco ma tagayee, meeshii uu dadka ku xidhi lahaa, kuwa ay is afgaranwaayaan ayuu sii diyaarsanayaa...*".

Hadalka Madaxweynuhu wuxuu ina tusayaa inta ay leegtahay ka war hayntiisa baraha bulshadu iyo inuu si fiican ula socdo arimaha isaga quseeya ee lagu hayo baraha bulshada, taasoo ah runtii wax fiican.

Hadaba aynu usoo noqono saameeynta uu buuga Miyiga ilaa Madaxtooyadu ku yeeshay baraha bulshadda. Warjecel.com waxay muddo isku hawshay inay soo akhrido faalooyin (comments) gaadhaya 6357 oo ay bulshadu ka bixisay qoraaladda lasoo dhigay Facebook iyo Twitter ee la xidhiidha buugga.

Marka qoraal wax gaar ah ka hadlaya la soo dhigo baraha bulshadda sida Facebook, inta baddan waxa dhacda in dadka faalooyinka ka qorayaa u kala qaaybsamaan sadex qaybood oo kala ah:

1. Qof qora faalo uu ku taageerayo ama ku amaanayo qoraalkaas uu akhristay.

2. Qof qora faalo uu kaga soo horjeedo ama uu ku dhaliilayo qoraalkaas uu akhristay.

3. Qof qora faalo aan taageersanayn qoraalka, isla mar ahaantaasna aan ka soo horjeedin, balse ah wax dhexe oo noqon kara inuu dhex-dhexaad ka ahaado qoraalkaas ama uu qoro wax qoraalkaasba aan la xidhiidhin.

Hadaba iyadoo aynu ka duulayno sadexda as qof, ayeynu u kala saari doonaa faalooyinka sidan:

- Faalo taageeris ah (Positive)
- Faalo kasoo horjeedis ah (Negative)
- Faalo midnaba ah (Neutral)


Natiijadii kasoo baxday akhriskii ay Warjecel soo akhriday faalooyinka labada bar-bulsho ee Facebook iyo Twitter ee ku saabsanaa hadal-haynta buugga Miyiga ilaa Madaxtooyadda waa sidan ka muuqata sawirka hoose.

Sida ka muuqata sawirka hoose faallooyinkeey Warjecel soo akhriday waxay ahaayeen kuwa lagu qoray labada bar-bulsho ee Facebook iyo Twitter, kuwaas oo tiro ahaan dhamaa lix kun sadex boqol konton iyo todobo.

| Barta | Total | Positive comments | Negative comments | Neutral comments |
|---|---|---|---|---|
| Facebook & Twitter | 6357 | 3,624 | 2288 | 445 |
| | | 57% | 36% | 7% |

*Sawir 1: Qaybsanka faallooyinka baraha bulshadda ee la xidhiidha buugga.*

Waxayna u kala qaybsameen sadex kun lix boqol laabatan iyo afar (3624) oo taageeris ah, laba kun laba boqol sideed iyo sideetan (2288)oo kasoo horjeedis ah iyo afar boqol afar iyo afartan (445) midnaba ama dhex-dhexaad noqday. Qaybsankaas kor ku sawirani waa tiro ahaan ee bal hadaba aynu muujino isagoo boqoleey (percentage) ah, si fahamku u fududaado.





*Sawir 2: Qaybsanka faallooyinka baraha bulshadda ee la xidhiidha buugga (boqoleey ahaan).*

Sawirka kore wuxuu ina tusayaa marka tiradii aynu kor ku soo xusnay loo badalo boqoleey oo noqonaysa taageris ah boqlkiiba konton iyo todobo (57%), kasoo horjeedis noqonaysa boqolkiiba sodon iyo lix (36%) iyo dhex-dhexaadnimo ama midnaba oo noqonaysa boqlkiiba todobo (7%).


Si aynu u fudeeydino fahanka qaybsanka faallooyinka, bal aynu tusaale sawir lasoo gooyey (screenshot) kasoo qaadano sadexdaas qaybood ee ay u kala baxeen dadkii qoray faallooyinku.

1. Tusaalaha dadka taageerista muujiyey ama faallooyinkoodu ahaayeen (positive).





*Sawir 3: Faallo taageeris ah (positive) Facebook.*

2. Tusaalaha dadka kasoo horjeedista muujiyey ama faallooyinkoodu ahaayeen (negative).




*Sawir 4: Faallo diidmo ama kasoo horjeesdis ah (negative). Facebook*

3. Tusaalaha dadka midnaba taageerin ee dhex-dhexaadnimada muujiyey ama faallooyinkoodu ahaayeen (neutral).




*Sawir5: Faallodhexdhexaadah(neutral)Facebook.*

## 4 Falanqaynta Warjecel

### 4.1 Buugu faa'iido ma u leeyahay bulshadda?

Buugga faa'iidada koobaad ee uu bulshada u leeyahay khaasatan dhaliinyaradu waa taariikhda guud ee qoraa Xirsi oo ah mid dhiirigalinaysa qofkasta oo jecel horumarka, waayo sida maqaalka qoraa Guuleed Xaashiba inoo sheegayo buugu wuxuu akhristaha galinayaa dareen ah inta meel hoose laga dhaqaaqo la gaadhi karo meel sare.

Buugu wuxuu siyaasiyiinta u horseedayaa inay taariikhdooda iyo waxqabadkoodaba qoraan intay noolyihiin, waayo sida ku xusan maqaalka qoraa Faarax Maxamuud, Xirsi wuxuu jeexay waddo siyaasiyiinta ku dhiirigalinaysa inay taariikh reebaan oo ay wax qoraan. Dhanka bulshadda reer Somaliland iyo reer Somalia oo uu warku gaadhayba waxay bilaabeen inay aad u hadal hayaan qoraalka iyo qoraanimada, taasoo la odhan karo waa wacyigalin kor u qaadaysay akhriska buugta iyo qoristoodaba.

Faa'iidada kale ee ugu muhiimsan ayaa ah in jiilka danbe iyo da'yarta soo koraysaa markay cilmi-baadhis sameeynayaan ay qoraaladooda tixraac u helaan, tusaale ahaan haday wax ka qorayaan dowladdii Madaxwayne Siilaanyo oo uu Xirsi ka mid ahaa dadkii ugu xogogaalsanaa.

Waxa kale oo faa'iido lagu tilmaami karaa in xogaha buugga ku duugan run iyo been, qalad iyo saxba ay cidii kasoo horjeeda jaanis u tahay in ay kala doodaan oo ay ka soo horjeestaan qoraaga buugga isna uu jawaabo cad ka bixiyo isgoo ilaalinaya xoriyada iyo madaxbanaanida ah in muwaadinku naqdin karo siyaasigiisa.

Ugu dambeeyntii sida garyaqaan Guuleed Dafac sheegay qoraalku wuxu faa'iido u yahay dadka xilka fadhiya hadda oo waxay iska ilaalin karaan qaladaadkii kuwii ka horeeyey ay sameeyeen. Waxa kaloo buugga laga faa'iideeysan karaa in dhamaan khaladaadkii dhacay mudadii uu madaxwaynaha ahaa Siilaanyo aan dusha uun isaga laga saari karin ee xisaabta lagu darsado in ay jirtay wakhti xasuustiisu hoos u dhacday.

## 4.2 Buugu sumcadii qoraaga ma korbuu u qaaday mise hoos buu u dhigay?

Marka aynu eegno maqaaladda ay warbixintu soo xigatay iyo xog uruurinta ay ka sameeysay warjecel.com baraha bulshadda khaasatan barta Facebook, waxaad arkaysaa in sumcadii qoraa Xirsi ay kor u qaaday qorista buugaasi. Hadii aynu cadeeymo u raadino sababta keentay inay kor u kacday sumcadii iyo taageerida shakhsiyeed ee uu qoraa Xirsi ku dhex lahaa bulshada, waxaynu xusi karnaa qodobadan hoose:

1. Ugu horeeyn markaad eegto xog ururinta aynu ka sameeynay baraha bulshadda waxa buugan iyo Xirsiba taageersan faallooyin badan oo boqolkii konton iyo tobdobo (57%) ka noqonaya dhamaan faallooyiinkii la bixiyey, taasi waxay ina tusaysaa inuu Xirsi sumcad korodhsaday baahintii buugga kadib.

2. Markaad daawato waraysiyadii laga qaaday Xirsi ee lagu waydiinayay arinta la xidhiidha xusuusta Madaxwayne Siilaanyo, waxaad arki kartaa inuu markasta isku si uga jawaabayey oo aanu hadalkiisuu lahayn isbadbadal, taas oo loo fahmi karo in arintaas wax ka jiraan.

3. Siyaasiyiintii Kulmiye ee qaarkood buugga lagu xusay oo markay naqdinayeen buugga aan runtii sheegin wax ka duwan ama ka xoogwayn qoraalka Xirsi, taasoo siisey Xirsi jaanis ah in loo arko inuu ragaas ka guuleeystay. Tusaale ahaan sida bare sare Cabdi Cali waraysigiisa ku sheegay Wasiir Maxamuud Xaashi bulshada umuu sheegin wax ka duwan intii Xirsi sheegay oo wuxuu ka jwaabay su'aal qaldan oo ahayd xiska madaxwaynuhu ma caadibuu ahaa, halkay su'aashu ka ahayd xasuusta madaxwaynuhu miyey is dhintay.

4. Marwada Madaxawayne Siilaanyo Marwo Aamina Waris oo ahayd qofka Xirsi uga dhawayd madaxwaynaha maybeenin qoraalka Xirsi oo taasina Xirsi jaanis kale oo lagu rumeysto ayay siisay.

5. Xirsi wuxuu dowladdiisii wax ka sheegay xili uu iska casilay oo haduu wax ka sheegi lahaa xili isaga xilka laga qaaday waxa loo arki lahaa nin cadhaysan.

6. Xirsi mudadii hadal hayanta buugu socotay wax cay ah ama aflagaado ah umuu marin saxaafadda dadkii kasoo horjeeday.

7. Sharciga iyo qanuunka markaad eegto sida garyaqaan Guuleed Dafac sheegay Xirsi wax sir ah muu sheegin waayo, sirta dowladu maaha mid qarsoon ee waa mid bulshada u furan.

Dhowrkaas qodob ee sumcada Xirsi kor u qaaday marka laga yimaado, waxa jirta sida qoraa Faarax Maxamuud maqaalkiisa ku sheegayo hal qodob oo wax u dhimi kara sumcada Xirsi, kaas oo ah in markii madaxwayne Siilaanyo ay xasuustiisu hoos u dhacday ee uu yidhi waan is casilayaa, in arintii uu ka tanaasulay madaxwaynuhu, kadib markii ay si qoys ahaana u wada hadleen, taasoo ina tusaysa inay jirtay qoysnimo qaranka maamusha.

Wasiir Maxamuud Xaashi oo sheegay inaanu Xirsi ka warami karin mudadii uu kasii maqnaa madaxtooyadda madaama oo aanu goobjoog ahayn, waxaad moodaa inuu Maxamuud Xaashi arinkaas ku saxsanyey, waayo goobjooge muu ahayn Xirsi sida iska cad.

Qofka si fiican ula socday wararkii iyo waxyaalihii dhacay xiligii dowladdii Madaxwayne siilaanyo ee Xirsina ahaa wasiirkii ugu hadalhaynta badnaa isla markaana maanta akhriya buugga Xirsi, runtii waxa usoo baxaysa in Xirsi yahay nin qalad iyo saxba wixii dowladdiisu sameysay ku sheegaya buugiisa, welibana aad ka dhadhansan karto inuu yahay nin intuu qabyaalada soo dhadhamiyey kadib ay ku qadhaadhaatay, maantan beegsanaya qaranimo iyo wada jir.

Waxyaalaha ku tusi kara inuu Xirsi hadda noqdo nin qaran waxa ka mid ah reerkiisii oo ay iska horyimaadeen, Gudoomiye Cirro oo ahaa nin ay saxaafada cay isu mariyeen oo uu maanta yahay ninka ay isugu dhowyihiin oo weliba uu Xirsi lugihiisa ku doontay, hal ku dhigii ololihii 2017 ee xisbiga Waddani oo uu ka dhigay "Giraan" taasoo ku tusaysay in macnaheedu yahay qarankoo dhan.

Siyaasiyiinta Somaliland way ku adagtahay in qaladaadkoodii ay sheegaan waxna ka qoraan, balse Xirsi waxaad moodaa inuu ku dhiiraday, waayo inuu nin go'aan adag yahay oo dhiirada waxa ku tusaysa amaanta uu Wasiir Maxamuud Xaashi oo ah nin ay is hayeen uu ka jeediyey xafladii bandhiga buugga isagoo leh Xirsi waxaan ku aqaan nin go'aan adag oo mabda'iisa u go'a. Warbixintani waxay saadaalinaysaa in muddo ka yar 12 sanadood uu Xirsi ku noqon doono Madaxwayanha Somaliland, kadib markay aragtay sida ay sumcadiisii kor ugu kacday iyo sida uu uga sii durkaayo qabiilkii ee uu ugu sii dhawaanayo qaranimo, taasoo maanta aan hore looga arag siyaasiyiinta gayiga soomaalida.

## 4.3 Saadaasha mustaqbalka iyo qoraanimada Xirsi

Mustaqbalka qoraanimo ee Xirsi waa mid u muuqda inuu sii soconayo, suuqa qoraalkana uu meel fiican ka helayo, laakiin wuxuu u baahanyay in uu kor usii qaado tayadiisa qoraanimo. Waxa jirta in Xirsi uu sheegay inuu soo waddo buugaag kale oo ka mid ah silsilada uu u bixiyey dhaxal-gal oo buuganina ka mid yahya.

Waxa jirtay in baraha bulshada la iskula wadaagay buugga oo PDF ah oo sida Xirsiba sheegay laga xaday madbacadii daabacday. Baahintaas buugga PDF-ka laba arimoodba waa loo qaadan karaa in looga xaday. Waata koobaade in Xirsi lagu niyad jabinayey, si uu u joojiyo buugta kale ee uu sheegay inuu soo wado, iyo ta labaad oo ah in lagala dagaalamayay inuu dhaqaale ka fa'iido, waana mid hadey markale kusoo noqoto wiiqi kartaa qoraanimadiisa.

Iibsiga iyo xiisaha loo qabo buugta uu Xirsi soo wadaa waxay ku xidhantahay hadba sida uu isagu xiiso ugu yeelo ee weliba uu runta uga sheego naftiisa xumaan iyo wanaagba, waayo sida uu inoo sheegayo bare sare Cabdi Cali qofka beenaalaha ahi waxba ma qori karo, markay qoraalka noqotana runtuunbaa soconaysa.

Waxa jirta in sanadkan 2019 lagu soo bandhigay magaalada Hargeysa buug ka kooban 16 cutub oo ka sheekeynaya sooyaalka taariikhda Madaxwayne Axmed Siilaanyo. Buugaas oo la magac baxay "Axmed Siilaanyo nin tacab badan geliyey qaranimada" waxa qoray Cabdiraxman Yuusuf Cartan oo ah xildhibaan golaha guurtida ah iyo masraxyahan. Hadaba buugan Cartan waxa muuqata in aanu yeelan hadal-hayn la mid ah tii buuggii Xirsi, waxaana dhici karta inay sabab u tahay iyadoo buuggaas aan wax qalad ah ama xun lagaga xusin Madaxwayne Siilaanyo, halka buugii Xirsi qalad iyo saxba isku dhafay.

Buugga Cartan waxa dhici karta in uu dhiiri galin ka helay buugii Xirsi, waayo Madaxwayne Siilaanyo isna hore ugu ma ay dhalan inuu buug iska qoro intii ku xeernaydna kama ay qorin. Arinkani waxaynu cadeeyn uga dhigi karnaa qoraa Faarax Maxamed oo sii saadaaliyey inuu Xirsi baneeyey waddo siyaasiyiinta kalena ku dhiirigalin karta inay wax qoraan oo taariikh reebaan, isaga oo u cuskanaya in ay yartahay siyaasi soomaali ah oo xusuus qor ka reeba noloshiisa ama hawlihii uu soo qabtay.

Ugu danbeeyntii marka aad eegto taageeraada ay dhaliinyarta u hayaan siyaasiyiinta casriga ah ee rabitaanka dhalinta inta badan la jaanqaada, waxaad moodaa inuu Xirsi haysto jaanis fiican oo uu ku noqon karo qoraa aad loo tixgaliyo buugtiisa, waa hadii uu jaaniskaas ka faa'iideysto.

## 5 Gunaanad

Warbixintani oo ku saabsanayd sida uu u saameey-ey bulshadda reer Somaliland buugii uu qoray Xirsi Cali X. Xassan ee "Miyiga ilaa Madaxtooyadda", waxa xooga aynu ku saarnay inaynu ogaano sida ay bulshadu u aragtay bugaas xumaan iyo samaan-ba. Warbixintu si ay uga fogaato qoraal ku salay-san hadal la yidhi oo aan cadeeyn lahayn waxay raadisay xogo dhab ah oo ay kasoo qaadatay qa-ybaha kala duwan ee bulshadda sida qorayaasha, bareyaasha sare, garyaqaanada iyo siyaasiyiinta.

Warjecel.com oo ah mareegta diyaarisay warbixin-tani waxay sameeysay xog uruurin ku salaysan tir-ro oo ay baadhay faallooyinkii laga bixiyey baraha bulshadda ee Facebook iyo Twitter iyadoo heshay in boqolkiiba toddoba iyo konton (57%) taageero u muujisay buugga iyo qoraagaba, halka boqolkii-ba lix iyo sodon (36%) ay kasoo hojeedsatay, bo-qolkiiba todobana (7%) dhexdhexaad ka noqotay.

Warjecel.com markay si fiican u fiirisay una dar-astay xogihii ay heshay waxay ogaatay in soo ban-dhigista buugaasi qoraa Xirsi u siyaadisay sumcad iyo taageero uu ka helay qaybaha kala duwan ee bulshadda, halka markii hore la saadaalinayay inuu Xirsi buugan sumcad xumo ku mutaysan karo.

Baadhistan waxa ka soo baxay in buugu kor u qaa-day wacyigalinta akhriska iyo qoraalka, maadaama oo uu keenay in ay bulshaddu ka dooddo, yaa wax qori kara iyo in ay dad badani akhristeen buugaba.

Warbixintu waxay saadaalisay in Xirsi xagga qora-animada uu hore ugu sii soconayo, madaama oo uu sheegay inuu soo wado buugaag kale oo la xi-dhiidha buugga "Miyiga ilaa Madaxtooyadda" oo uu dhamaantood ugu magac daray silsilada dhax-al-gal.

Ugu danbeeyntii warbixintu waxay saadaalisay in Xirsi jaaniska fiican ee horyaal iyo sumcadiisa kor u kacday darteed uu madaxwayne ku noqon doono muddo ka yar 12 sanadood.

## 6 Tixraac


Eryal Somali TV. (2018, October 31). Barnaami-jka Gaara Maxamuud Xaashi Cabdi oo ka hadlay Buugii Xirsi [Video file] Retrieved from https://www.youtube.com/watch?v=tFruo_gRzBE.

Farhan Media Pro. (2018, October 27). #Si-yaasi Maxamuud Xaashi Oo Ka Hadlay Gaf Ku Jira Buuga Xirsi Ee Madaxtooyada Ilaa Miiga [Video file] Retrieved from https://www.youtube.com/watch?v=y_RJO2-xlf0.

Horn Cable Tv. (2018, November 1). Deg deg: Wiil Ku Dhintay Balliga Daami Ee Hargeysa iyo Dareenka Hooyada Dhashay [Video file] Retrieved from https://www.youtube.com/watch?v=ApWBH2AVUz4.

Juba Tv. (2018, October 27). Jamaal Cali Xus-een Muxuu ka yidhi #Xirsi Buuga Miiga #Madax-toyada [Video file] Retrieved from https://www.youtube.com/watch?v=2M08rchSn3E&t=19s.

Maxamed, F. (2018, November 11). Gorgayn Buuggii Xirsi Cali X. Xasan ee "Miyiga ilaa Mad-axtooyada". Retrieved from https://burcoonline.com/articles/79027/GORFAYN-BUUGGII-XIR-SI-CALI-X-XASAN-EE-MIYIGA-ILAA-MADAX-TOOYADA-FAARAX-MAXAMUUD-MAXAMED-SHEE-KO-XARIIR.

SAAB TV. (2018, November 1). Pof Cabdi Cali, "Max-amuud Xaashi wuxuu ka jawaabay su'aal aan meesh oolin" [Video file] Retrieved from https://www.youtube.com/watch?v=t_ReTX9hNy8&t=120s.

SAAB TV. (2018, November 4). Waraysi gaar ah garayaqaan Guuleed Dafac I Buuga Miyi - Madax-tooyada [Video file] Retrieved from https://www.youtube.com/watch?v=aflQUbSuM4k&t=406s.

Xaashi, G. (2018, November 11). Gorfaynta Buugga "Miyi Ilaa Madaxtooyada". Retrieved from http://www.hubaalmedia.net/gorfaynta-buugga-miyi-il-aa-madaxtooyada-w-q-guuleed-axmed-xaashi/.

Xirsi, X. (2018) Miyiga ilaa Madaxtooyada: Socdaalkaygii Guusha. Hargeysa: Asal Printing Press.